



## Information about elections [electionsfinland.fi](http://electionsfinland.fi)

### **Doorashada wakiilada golaha baarlamanka 2019**

Doorashada wakiilada golaha baarlamanka waxa la qabtaa afartii sanaba mar. Wakhtiga doorashadaas muwaadiniinta Finland ayaa doorta wakiilada golaha baarlamanka oo 200 oo wakiil ah. Wakiiladaas ayaa go'aan ka qaata danaha an wadaagno.

Doorashada wakiilada golaha baarlamanka ee sanadka 2019-ka waxa la qabanqaabinaya maalinta axadda ah ee 14.4.2019.

Codaynta hore waxay ka dhacaysaa Finland 3.-9.4.2019  
waddamada dibaddana waxay ka dhacaysaa 3.-6.4.2019.

### **Shaqada golaha baarlamaanka**

Shaqada ugu muhiimsan ee golaha baarlamaanka waa in ay dajjiyaan xeerarka mushtamucu uu ku dhisanyahay.

Shaqada labaad ee muhiimka ah waxa weeyaan inay go'aamiyaan miisaaniyadda dhaqaale ee dowladda.

Miisaaniyadda dhaqaalah waxa lagu qoondeeyaa halka ay dowladdu lacag ka helayo iyo waxa lacagtaas loo isticmaalayo.

Golaha baarlamanku sidoo kale waxay kormeeraan qaabka ay dowladdu lacagta u isticmaasho.

Golaha baarlamanka ayaa doorta raysul wasaaraha dowladda waxayna kormeeraan waxqabadka dowladda.

Intaas oo dhan waxa dheer inay golaha baarlamanku go'aan ka qaataan ra'yiga dowladda Finland ee ku saabsan arrimo badan oo la xidhiidha midowga Yurub.

## **Ayaa codayn kara?**

Adiga ayaa ka codayn kara doorashada wakiilada golaha baarlamanka haddii,

- aad tahay muwaadin Finnish ah oo ad sidoo kale,
- buuxisay 18 sano ugu dambayn 14.4.2019.

## **Ogaysiinta xuquuqda codayntu waxay kuugu soo dhacaysaa gurigaaga**

Haddii ad xaq u leedahay in aad codayso

warqad ayaa guriga kuugu soo dhacaysa.

Warqadda lagugu ogaysiinayaa in aad xaq u leedahay in aad codayn karto waxa kale oo kuugu qoran macluumaadka la xidhiidha goobta ad ka codaynayso maalinta codaynta.

Waxa kale oo kuula socda liiska goobaha codaynta hore laga sameeyo.

## **Ayaad u codayn kartaa?**

Finland waxa loo kala qaybiyyay 13 gobal oo doorasho. Gobal kasta waxa ka sharaxan musharraxiin u gaar ah.

Waxad u codayn kartaa shaqsiga musharraxa u ah golaha baarlamaanka ee gobalkaaga ka sharaxan.

Gobalka ad ka sharaxan tahay waxa lagugu ogaysiinayaa ogaysiinta xuquuqdaada codaynta.

Musharax kasta waxa uu leeyahay tiro u gaar ah oo musharaxnimo. Tusaale ahaan goobaha codaynta ayaad ka arki kartaa musharaxiinta gobalkaaga tiradada u gaarka ah ee loogu codeeyo. Macluumaadka ku saabsan musharaxiinta waxad ka heli kartaa tusaale ahaan jaraa'idada, telefishanka iyo internetka.

## **Ku codaynta guriga**

Haddii aad tahay qof si aad ah naafo u ah ama muddo aad u dheer xanuunsan, waxaad codbixinta hore ku codeyn kartaa gurigaaga dhexdiisa.

Waa in aad isku diwaan galisaa in aad guriga ka codaynayso.

2.4.2019 saacadda 16 intaanan la gaadhin ayaad diwaan galintaada u gudbinaysaa guddiga xarunta doorashooyinka ee degmadaada.

Lambarka taleefanka ee guddigaas waxad ka heli kartaa warqadda ogaysiinta xuquuqda codaynta ee kuu soo dhacday.

Guddigaas waxad sidoo kale ka heli kartaa maclummaad faahfaahsan oo ku saabsan ku codaynta guriga.

### **Sidaan baad hore ugu codeyn kartaa**

Codaynta hore ee doorashada wakiilada golaha baarlamanka waxaad ka codeyn kartaa meel kasta oo ka mid ah goobaha codaynta hore ee Finland ama dibadda ah.

Marka aad u socoto codbixinta waxaad hore u sii qaadataa aqoonsigaaga shakhsiyadeed, tusaale ahaan baasaboor, kaarka aqoonsiga (teesare) ama ruqsadda gaari wadista (leeyinka).

1. Waxaad aqoonsigaaga shakhsiyadeed tustaa howl-wadeennada ka shaqeynaya goobta dooraashada.  
Howl-wadeenku wuxuu hubinayaa aqoonsigaaga, wuxuuna ku siinayaa waraaqda codeynta.
2. Waxaad qaadataa waraaqda codeynta, islamarkaana waxaad gashaa qolka codeynta.  
Waxaad waraaqda codeynta si cad oo muuqata ugu qortaa lambarka musharraxa aad u codeyneyo.  
Waraaqda codeynta wax kale ha ku qorin.
3. Dhexda iskaga laab waraaqda codeynta.
4. Ku soo laabo halkii uu joogay howl-wadeenka.  
Waxaa uu shaabad saari doonaa waraaqda codeynta, waxaana uu ku siin doonaa baqshad midabkeedu banni ama kafee khafiif ah yahay.  
Waraaqdii codeynta ku rid baqshadda, dabadeedna isku qabo labada af ee baqshadda oo iskula xir xabagta ama koollada marsan labada dhinac ee baqshadda .
5. Howl-wadeenku waxaa uu kaa codsanayaa inaad foomka saxiixdo.

Saxiixaas waxaad ku qireysaa, inaad adigu tahay qofka buuxiyay kaarka codeynta, laguuna shaabadeeyay, islamarkaana aad baqshadda ku xirtey.

6. Ugu dambeyntiina howl-wadeenka ayaa baqshaddii doorashada iyo foomkaba waxaa uu dhixgalinaya oo ku xiraya baqshad kale oo midabkeedu yahay jaalle ama huruud, si loo diro waraaqda.

Markaad codeyso, waad ka bixi kartaa goobtii codbixinta doorashada.

### **Sidan ayaad u codaynaysaa maalinta codaynta**

Maalinta codaynta 14.4.2019 goobaha codayntu waxay furanyihiin saacadda 9-20.

Ka hubi warqadda ogaysiinta xuquuqda codaynta ee laguu soo diray goobta ad adigu ka codayn karto.

Waxa kuu bannaan in aad ka codayso goobta warqada ogaysiinta xuquuqda codaynta kuugu qoran oo kaliyaata.

Marka aad u socoto codbixinta waxaad hore u sii qaadataa aqoonsigaaga shakhsiyadeed, tusaale ahaan baasaboor, kaarka aqoonsiga (teesare) ama ruqsadda gaari wadista (leeyinka).

1. Wuxaan aqoonsigaaga shakhsiyadeed tustaa howl-wadeennada ka shaqeynaya goobta dooraashada.  
Howl-wadeenku wuxuu hubinaya aqoonsigaaga, wuxuuna ku siinaya waraaqda codeynta.
2. Wuxaan qaadataa waraaqda codeynta, islamarkaana waxaad gashaa qolka codeynta.  
Wuxaan waraaqda codeynta si cad oo muuqata ugu qortaa lambarka musharraxa aad u codeyneynso.  
Waraaqda codeynta wax kale ha ku qorin.
3. Dhexda iskaga laab waraaqda codeynta.

4. Ku soo laabo halkii uu joogay howl-wadeenka.  
Waxaa uu shaabad saari doonaa waraaqda codeynata.
5. Ku rid warqaddaada codaynta sanduuqa codaynta.
6. Ugu dambaynta howl-wadeenku wuxuu ku ridaya baqashadda codaynta iyo foomka baqshad lagu dirayo oo huruud ama jaalle ah.

Markaad codeyso, waad ka bixi kartaa goobtii codbixinta doorashada.

### **Yaad cawimaad ka heli kartaa?**

Howl-wadeennada doorashada ayaad ka heli kartaa wixii talo ah ee la xiriira maalinka hore ee doorashada iyo maalinka doorashadaba.

Goobta doorashada waxaa jooga caawiye qaabilsan arimaha doorashada . Haddii aadan adigu awoodin in aad buuxiso waraaqda codeynata, waxaad caawiyaha doorashada u kaxeysan kartaa qolka codeynata si uu kuu caawiyo.

Caawiyaha arimaha doorashada waxaa kuu noqon kara qof aad adigu keensatay, tusaale ahaan qof ehelkaaga ama qaraabadaada ah. Hase yeesh ee caawiyuhu ma noqon karo qof musharrax ah ama musharraxa qaraabadiisa ah. Caawiyaha doorashadu cidna uma sheegi karo, qofka aad u codeysay.

### **Sirta doorashada**

Qof walbaa isaga ayaa iska leh go'aanka ah inuu codeynaayo iyo in kale, iyo qofka uu u codeynaayaba.

Sirta doorashada waxaa loola jeedaa, in aadan cidna u sheegin qofka aad u codeyneysa.

(JALDIGA DAMBE)

Ka codee doorashada wakiilada golaha baarlamanka!

Warqaddan waxa luqad faseex ah laguugu siinaya warbixin ku saabsan codaynta iyo doorashada wakiilada golaha baarlamanka ee 2019-ka.

Faah-faahin dheeraad ah oo la xiriirta codaynta waxaad ka heleysaa:

[vaalit.fi](http://vaalit.fi)

[selkokeskus.fi](http://selkokeskus.fi)

Wasaaradda cadaaladda

Selkokeskus